Barashada Inta Ka Dambeyso Muhiimadda

Ardayda waxay aqoon muhiim ah ka gaari doonaan meelaha muhiimka ah, kana fog daruusta muhiimka ah ee Ingiriisiga, xisaabta, sayniska, iyo daraasaadka bulshada.

Fanka Muuqda

- Aqoonso kaddibna magacaaw alaabta loo isticmaalo fanka
- Sharax siyaabaha kala duwan uu fanka u sheego caatifadda ama shucuurta
- Samee fan sahmiya mowduuc dhexe
- Gaarsii fikradaha iyo sheekooyinka ay ku arkaan shaqada fanka
- Sahmi dhawaaqyada kala duwan iyo qalabka fasalka
- Hees heesho laga soo qaado xasuusta, kaddibna u gudub muusiiko kala nooc ah
- Sharax sida dhawaaqyada iyo muusikada loogu adeegsado nolol maalmeedka

Aqoonta Jimicsiga

- Qabo kubad soo booda kaddibna baro siyaabaha kala duwan ee loo tuuro
- Kala saar heerarka kala duwan dadaalka (tusaale ahaan, daciif, fudud, tartiib)
- Kala saar xiiladaha dhaqaaqa iyo dhaqaaq-la'aanta
- Aqoonso siyaabaha looga qeybgalo dhaqaaqa jirka dugsiga dibadiisa.
- Sahmi hawlaha ku biiriya nolol caafimaad qabta

Si aad u heshid macluumaad badan

www.westerville.k12.oh.us
education.ohio.gov/Parents
www.pta.org

Westerville City Schools
Office of Academic Affairs
936 Eastwind Drive
Westerville, OH 43081
www.wcsoh.org

Manhajka Xanaanada: Tilmaanta Waalidka

Tilmaantaan waxay ku siisaa kor ka eegid ku saabsan waxa cunugaada baran doono marka la gaaro dhamaadka Xanaanada, sida ku saleysan Heerarka Barashada ee Ohio . Ujeedooyinka tilmaantaan waxay yihiin in la fahmo xirfadaha muhiimka ah iyo fikradaha loo baahan yahay in cunugaada uu haysto marka la gaaro dhamaadka Xanaanada.



Fanka Luqadda Ingiriisiga



Barashada xirfadaha luqadda cusub waxay calaamad u tahay Cunugaada wuxuu baran doonaa alfabeetada iyo kaalinta ay ku leedahay akhriska, wuxuuna ku celcelin doonaa dhawaaqa, wuxuu israacin doonaa erayada ku bilowda dhawaaq, iyo wuxuu dhawaaqa ku qasi doontaa erayo. Cunugaada wuxuu kaloo bilaabi doonaa in uu wada adeegsado sawirka, qorista, iyo qorista xarfaha si loo qeybsado maclu-umaadka iyo fikradaha.

Dhowr shay uu cunugaada baran doono waxaa ka mid ah:

- Magacaabidda xarfaha kore iyo hoose, israacinta xarfahaas iyo dha-waaqa, iyo daabicidooda
- Dib u sheegidda sheekooyin caan ah iyo ka hadalka sheekooyinka iyadoo la adeegsanaayo tafaasiil laga soo qaaday qoraalka
- Sheegidda fikrad ama rabitaan ku saabsan mowduuc ama buug, lana qoro
- Fahamka iyo isticmaalka erayada su'aalaha marka la wada hadlaayo
- In si fasiix ah loo hadlo si loo soo jeediyo malo iyo fikrado
- Isticmaalka erayada aragga iyo sawirada si loo akhriyo qoraalada heerka bilowga

Xisaab

Ardaydena waxay la yimadaan faham balaaran xagga xisaabta. Marka la gaaro dhamaadka Xanaanada, waa lagama maarmaan in aasaas adag loo leeyahay xisaabta. Hoos waxaa ku qoran tusaalooyin ku saabsan waxa laga filaayo Xanaanada.

- Tiri ilaa 20 shay, aqoonso kaddibna qor nambarada ilaa 20, tiri hal hal (1's) ilaa 100 laga bilaabo nambar kasta, tiri toban toban (10's) ilaa 100
- Isbarbar dhig labo nambar sida ka weyn, ka yar, ama la'eg
- Samee kaddibna kala qaad nambarada inta u dhexeyso 11 iyo 19, una kala qaad toban toban iyo hal hal

- Macno u yeel iyo xalli masaladaha fudud ee iskudarka iyo kala goynta, adiga oo adeegsada shay, faraha, sawirada, iwm.
- Isbarbar dhig miisaanka, joogga, iyo dhererka ilaa 3 shay
- Aqoonso, sharax, iyo dhis qaabab



Saynis

Mowduuca saynis ee ku jira darajooyinka bilowga waa fiirinta jawiga si ardayda loogu kaalmeeyo in ay fahmaan dunida dabiiciga ee ku wareegsan iyaga iyo in ay yeeshaan dareen ay wax ku oga-daan.

Barashada Xanaanda waxay xoogga saari doontaa:

- Waxyaabaha nool waa ka duwan yahiin waxyaabaha aan nooleyn; waxyaabaha nool waxay leeyahiin waxyaabo lagu yaqaan iyo dabeecado saameeya noloshooda
- Isbaddalada cimilada waa muddo gaaban iyo muddo dheer
- Bisha, qoraxda, iyo xiddigaha waxaa la arki karaa waqtiyo kala duwan maalinta iyo habeenka
- Waa la kala saari karaa shayga iyo maadooyinka, waxaans lagu sifeyn karaa dabeecadahooda
- Dhawaaqa waxaa sabab u ah marka shayga lusho

Daraasaadka Bulshada

Mowduucyada Daraasaadka Bul-shada ee Xanaanada waxaa ka mid ah taariikhda, dawladda, joqfraafiyada, iyo dhaqaalaha. Fahamka loo baahan yahay in ar-daygaada uu ka qabo Daraasaadka Bulshada xagga Xanaanada waxaa ka mid ah:



- Waqtiga waa la cabbiri karaa
- Dadka waxay qabaan rabbitaan badan iyo waa in ay gaaraan go'aano ku saleysan rabbitaankaas
- Waxaa la isticmaali karaa erayada la xariira jihada iyo masaafa-da si looga hadlo makaanka ay ku yaalaan meelaha caanka ah
- Dadka waxay qeybsadeen mas'uuliyadda ka saaran gaarista ujeedooyinka caadiga ah
- Qaababka iyo khariidooyinka waxay mattalaan meelo
- Dhaxalka waxaa lagu muujiyaa fanka, caadada, hiddaha, xafla-daha qoyska, iyo luqadda
- Ujeedada sharciyada waa in la dhowro nidaamka, ammaanka, iyo nabadda